



# Hagaha kala soocida Bacda cagaaran



# **Waanu ku salaamaynaa!**

Ma ogtahay in wax badan oo ay nuu tuurnaa ay yihiin haraaga cuntada? Waxay tusaale ahaan noqon kartaa cunto ka soo hartay marka cuntada la karinayo, cunto gabowday oo xumaatay ama cunto saxanka lagaga tegey.

Bilawga sannadka 2023 waxaanu ku soo bandhigi doonaa degmada Kinda bacda cagaaran. Bacda cagaaran waxaa ku jira haraaga cuntadaada waana la daryeeli doonaa waxaana loo beddeleyaa shidaalka gaaska iyo digo ama dhiriq (beeraha lagu bacrimiyo). Waxa kaliya oo ay tahay inaad adigu samayso waa inaad haraaga cuntadaada ku riddaa bacda cagaaran ka dibna aad ku ridaa qashinkaaga caadiga ah. Kadibna annaga ayaa daryeeli doona inta kale.

Kani waa hage ku saabsan sida loo kala soocayo Bacda cagaaran kaas oo ka warbixinaya waxa lagu ridayo Bacda cagaaran.

**Horumar waara  
Sideedaba fudud**

# Sidan ayey u shaqaynaysaa - Hadhaaga cuntadaadu wuxuu noqdaa shidaalka gaaska iyo digo ama dhiriq (beeraha lagu bacrimiyo).

1. Waxaad ku ridaysaa haraaga cuntadaada bacda cagaaran.

2. Marka ay bacdu buuxsanto, xir laba jeer oo ku rid qashinkaaga caadiga ah, sida bacaha kale ee qashinka.




3. Baabuurka qashinka ayaa faaruqinaya qashinka wuxuuna geynayaa bacaha qashinka goobta aragtida wax ku kala soocada ee Linköping.

4. Bacaha cagaaran si otomaatig ah ayey u soocmayaan iyadoo la adeegsanayo kamaradaha ku yaala xarunta. Sagaal xarumood oo kamarado kala duwan ayaa akhriya midabka cagaarka ah ee bacaha oo si gaar ah u kala soocaya. Bacaha kale ee qashinka ah ee ay ku jiraan qashinka haraaga ahi waxay hore sii u raacayaan suunka dheer oo geynaya Gärstadverket ee Linköping waana la gubaa oo waxa

laga sameeyaa kulaylaylka, qabowga iyo korontada magaalada. Sidaaa ayaa si fiican looga faa'iidaysan karaa tamarta ku jirta haraaga qashinka.

5. Haraaga cuntada ee ku jira bacaha cagaaran waxay noqdaan shidaalka gaaska ah iyo digo ama dhiriq (beeraha lagu bacrimiyo).oo lagu sameeyo goobta Tekniska verken. Bacda lafteeedu way ka soocmaysaa cuntada haraaga ah oo waxay noqonaysaa kulayl iyo koronto.

6. Shidaalka gaaska waxa loo isticmaalaa sida shidaalka gaadiidka, basaska iyo baabuurta. Digada ama dhiriqda (beeraha lagu bacrimiyo) waxay beddelaysaas bacrimiyeyaasha macmalka ah waxaana loo isticmaalaa sida bacriminta nafaqada ee beeraha. Sidan ayey nafaqooyinka laga helo qashinka cuntada loogu isticmaalaa in lagu beero unto cusub mar kale.



# Tan/kan waxaad ku ridaysaa/ tuuraysaa bacda cagaaran!



**Khudaarta miraha ah ee la cuno iyo khudaarta cagaaran**  
Qashin, qolof iyo iniino iyo sidoo kale khudaarta miraha ee la cuno iyo khudaarta cagaaran.




**Cuntada baruurga/subaga leh**  
Subag, maargariin, saliid iyo cuntada kale ee baruurga/subaga leh.



## Lafo iyo qolof

Hilibka iyo lafaha kalluunka/malaayga, Haraaga kalluunka/malaayga marka la nadiifiiyo, qolofta ka timaada cuntada badda iyo ukunta.



**Haraaga cuntada**  
Cuntada karsan iyo tan aan la karsanayn



**Kafeega/bunka iyo Shaaha**  
Kafeega/bunka iyo shaaha, shaandhada (filter)

**FIIRO GAAR AH!** Marka bacda cagaaran ay buuxsanto, laba jeer afka ka xir inta aadan ku ridin qashinka caadiga ah ka hor.

## Tan/kan **KUMA** ridaysid/tuuraysid bacda Cagaaran!



**Daawooyinka**  
Daawooyinkii hore ee xumaaday waa in la keeno farmashiyyaha.



**Waraaqaha afmariska & waraaqaha**  
Waraaqaha, waraaqaha afmariska, dharka, xafaayadaha, faashadaha iyo xafaayadaha dumarka



**Tubaakada**  
Haashka sigaarka iyo tubaakada/buuriga



**dhirta**  
Ubaxyada dheryaha ku jira, carrada wax lagu beero iyo qashinka beerta jardiinada guriga.

**FIIRO GAAR AH!** Wargeysyada/joornaalada, baakadaha, kartoonada, bacaha, dhalooyinka, biraha, kiimikooyinka iyo qaar kale oo badan waa in la geeyaa meelaha alaabta dib loogu warshadeeyo.

Marka ay bacuhu dhammaadaan, kaga xir markaa bac cagaaran afka qashinkaaga si uu gaadhiga qashinku u keeno baco cusub oo isku duuban Haddii aad deggen tahay guri kiro ah, mulkiilahaaga ayaa ku wargelin doonaa meesha aad ka soo qaadanayso bacaha cusub.



**Kinda  
kommun**